# Qiimeyno Badel ah

**oo loogu talagalay Ardayda qaba Naafonimada ugu Wayn ee la xariirta Garaadka**



Qiimeynta Badelka ah ee Ohio ee loogu talagalay Ardayda qaba Naafonimada ugu Wayn ee la xarirta Garaadka (Students with the most Significant Cognitive Disabilities, AASCD), ama qiimeynta badelka ah, waa qiimeyn uu doonaayo federaalka oo loogu talagalay in laga qaado ardayda qaba naafanimada ugu wayn ee la xariirta garaadka. Qiimeynta badelka ah waxaa lagu saleeyaa Heerka Waxbarashada Ohio ee La Balaariyay (Ohio's Learning Standards–Extended, OLS-E). Waxay u oggolaanaysaa tiro yar oo kamid ah ardayda qaba naafonimada ugu wayn ee la xariirta garaadka inay muujiyaan aqoontooda iyo xirfadahooda qiimeynta ku habboon.

## Waxyaabaha ay tahay in Qoysasku ka ogaadaan Qiimeynada Badelka ah

Go'aansashada in cunugu uu ka qaybqaato qiimeynta badelka ayaa noqon karta wax adag. Qaar kamid ah qoysaska ayaa ka welweli kara in cunugoodu dareemo walaac ku aadan sameynta baaritaanada gobalka ee joogtada ah. Isla mar ahaantaas, qoysasku sidoo kale waxay ka walwalaan in dadka kale aysan wax badan ka filaneynin carruurta gala qiimeynta badelka ah. Dukumiintigaan waxaa ku qoran xog ka caawinaysa qoysaska inay si fiican u fahmaan qiimeynta badelka ah iyo sida go'aankaan loola gaaro kooxda IEP-da.

## Sida Kooxda IEP-da u Go'aamiso in Cunug uu U qalmo Qiimeynta Badelka ah

Kooxda Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah ee ardayga (Individualized Education Program, IEP) waxay isticmaalaan xogo/ilo kaladuwan si ay u go'aamiyaan u qalmida qiimeynta badelka ah. Xogahaan waxay noqon karaan:

- Tusaalayaasha shaqada;
- Natiijada qiimeynada macallinku sameeyo xilliga waxbarashada;
- Qiimeynada gaaban ee ardayda iyo qiimeynada lagu oggaado cudurka;
- Xogta wax ka qabadyada ku saleysan caddaynta;
- Qiimeynada baahiyaha taageerada;
- Qiimeynta teknoolajiyada caawineed;
- Xogta ardayga/bartaha;
- Adeegyada iyo taageerooyinka maalinlaha ah ee uu bixiyo kaaliye ama kaaliye xirfadyaqaan; ama
- Taageerooyinka waxbarashada ee maalinlaha ah ee ay bixiyaan khabiiro wax-ka-qabasho.

Buundada baaritaanka garaadka ardayda (IQ) ama naafo gaar ah kaligeed laguma go'aamin karo in ardaygu qabo naafonimo wayn oo la xariirta garaadka. Naafonimada wayn ee la xariirta garaadka waxaa lagu saleeyaa fahan dhammaystiran oo ilmaha laga qaato. Qiimeynta badelka ah waxa loogu talagalay qayb yar oo kamid ah ardayda naafonimadooda si weyn u saameyso awoodooda garaadka iyo inta badan xirfadahooda nololeed.

## Baaritaan ku Sameynta Dhammaan Ardayda

Sharciyada federaalka iyo kuwa gobalka waxay dhigayaan in dhammaan ardaydu ka qaybqaataan baaritaanada degmada iyo kuwa gobalka. Sharciyadaan sidoo kale waxay khuseeyaan ardayda qaba naafonimada wayn ee la xariirta garaadka. Ardaydu waxay galaan baaritaanada guud ama qiimeynada badelka ah midkood. Marka dhammaan ardaydu ka qaybqaataan baaritaanka, waxay xog muhiim ah siisaa gobalka iyo dugsiyada kuna saabsan sida ardaydu wax u baranayaan.

# Qiimeyno Badel ah

**oo loogu talagalay Ardayda qaba Naafonimada ugu Wayn ee la xariirta Garaadka**

## Qiimeynta Joogtada ah ama Qiimeynta Badelka ah

Inta badan ardayda leh IEP-da iyo naafonimada wayn ee la xariirta garaadka waxay galaan qiimeynada gobalka ee joogtada ah. Qaar kamid ah ardaydaas waxay gali karaan qiimeynada joogtada ah ayagoo adeegsanaaya adeegyo. Ardayga indhoolaha ah oo isticmaala elektarooniga qora farta indhoolaha si uu u dhameystiro qiimaynta ayaa ah tusaalaha adeegga. Tusaale kale ayaa ah ardayga leh karti xadidan wuxuu qaataa waqti badan oo uu ku qoro jawaabaha. Kaliya ardayda qaba naafonimada ugu wayn ee la xariirta garaadka ee aan gali karin qiimaynta gobolka ee joogtada ah, xataa haddii la siiyo adeeg, waa inay qaataan AASCD.

Tirada ardayda qaba naafonimada ugu wayn ee la xariirta garaadka ee u baahan doona inay qaataan qiimeynta badelka ah aad bay u yar tahay. Marka laga imaado barashada xirfadaha aasaasiga ah, ardayda qaba naafonimada wayn ee la xariirta garaadka waa inay galaangal u leeyihiin manhajka guud. Ardayda qaba naafonimada ugu wayn ee la xariirta garaadka waxay ku helayaan xogtaan waxbarashada ku saleysan Heerarka Waxbarashada Ohio ee la Balaariyay.

## Astaamaha Ardayda U qalma Qiimeynta Badelka ah.

Ardayga u qalma qiimeynta badelka ah waxay u badan tahay:

- Inuu kujiro habka hormarinta nidaamka xirfadaha iyo wada xiriirka joogto ah tusaale ahaan, hadda muujiya xirfadaha aan hadalka ahayn ama adeegsada xiriirka aan calaamadaha lahayn oo xadidan;
- Inuusan muujin iswaafaqsanaan joogto ah marka uu muujinaayo waxyaabaha uu rabo ama u baahan yahay. Waxay u badan tahay in ardayga u baahan yahay kaalmada dadka waawayn ee ugu badan si uu u sameeyo xariir la fahmi karo;
- Inuu u baahan yahay manhaj iyo waxbaris si weyn wax looga badelay iyadoo la isticmaalaayo OLS-E badanaana uma muuqato inuu isticmaalo ama fahmo xirfadaha ka baxsan goobta fasalka;
- Inuu u baahan yahay habab taageero (adeegyada, baxnaaninta ilmaha iyo teknoolajiyada caawimeed) si uu u raaco tilmaamaha iyo jadwalka hawlaha joogtada ah; ama
- Inuu u baahan yahay waxbarasho xooggan iyo taageero joogto ah ee ku saabsan xirfadaha madadaalada iyo fahanka, sababtuna ma aha awood jireed oowgeed laakiin waa baahiyaha garaadka ee wayn.

## Xog Dheeraad ah

Si ay u taageerto qoysaska iyo kooxaha IEP-da, Waaxda Waxbarashada Ohio waxay abuurtay Qalabka Go'aan-ka-qaadashada Ka Qaybgalka Qiimeynta Badelka ah. Qalabka waxaa la sameeyay ayadoo gacan laga helaayo iskaashatada sida waalidiinta, macalimiinta iyo maamulayaasha. Qalabka waxaa laga doonayaa inay isticmaalaan kooxda IEP-da, oo ay kujiraan waalidiinta, si loo go'aamiyo in ardaygu u qalmo qiimeynta badelka ah.

Xog badan oo ku saabsan qiimeynta badelka ah ka baro oo ka hel qalabka webseedka Waaxda.